

**FOOMKAN WAXA LOOGU TALAGALAY MACLUUMAAD OO KELIYA.
HA BUUXIN. KANI MA AHA ARJI.**

Arjiga kaadhka Social Security (Badbaadada Bulshada)

Dalbashada kaadhka Social Security (Badbaadada Bulshada) waa bilaash!

U ISTICMAAL ARJIGAN SI AAD:

- Si aad u dalbato kaadhka Social Security (Badbaadada Bulshada) ee rasmiga ah
- Codso kaadhka Social Security (Badbaadada Bulshada) oo bedel ah
- Si aad u bedesho ama aad u saxdo macluumaadka lambarkaaga Social Security (Badbaadada Bulshada)

MUHIIM: WAA INAAD bixiso arjiga buuxa ee munaasabka ah oo aad heshaa cadaymaha loo baahan yahay kahor inta aanad lasii wadin arjigaaga. Waxa aanu kaliya aan aqbali karnaa waraaqaha rasmiga ah ama waraaqaha ay xaqijisay cida gacanta ku haysa duwaanada rasmiga ah. Nuqlada nootaayada ama footokoobiga aanay xaqijin cida gacanta ku haysa duwaanka lama aqbalayo. Waanu soo celin doonaa wixii waraaqo ah ee aad lasoo gudbisay arjigaaga. Wixii kaalmo ah ee nagala soo hadal 1-800-772-1213 ama booqo websaytkeena www.socialsecurity.gov (kaliya ku qoran Ingiriisi).

Kaadhka rasmiga ah ee Social Security (Badbaadada Bulshada)

Si aad u dalbato kaadhka rasmiga ah, waa inaad keentaa labo waraaqo ugu yaraan oo cadaynaya da'da, aqoonsiga, dhalashada Maraykanka ama sharciyada wakhtigan, xaalada laanta socdaalka ee ogolaanshaha in la shaqeeyo. Hadii aanad haysan dhalashada Maraykanka oo aanad haysan ogolaanshaha shaqada ee DHS, waa inaad cadaysaa inay jiraan sababo sax ah oo kale oo aad u dalbanayso kaadhka. Ka eeg bogga 2 wixii sharaxaad ah ee waraaqaha la ogol yahay.

OGGOW: Hadii aad tahay 12 jir ama ka wayn tahay oo aanad hore u qaadan lambarka Social Security (Badbaadada Bulshada), waa inaad u dalbataa si shakhs ahaaneed.

Bedelka kaadhka Social Security (Badbaadada Bulshada)

Si aad u dalbato kaadh bedel ah, waa inaad keentaa hal waraaqo oo xaqijinaya aqoonsigaaga. Hadii aad ku dhalatay meel ka baxsan Maraykanka, waa inaad sidoo kale keentaa waraaqaha si aad u xaqijiso in aad hysato dhalashada Maraykanka ama wakhtiga xaadirkan, si sharci ah inaad ku degan tahay, xaalada ogolaanshaha shaqada. Ka eeg bogga 2 wixii sharaxaad ah ee waraaqaha la ogol yahay.

Bedelka macluumaadka duwaankaaga Social Security (Badbaadada Bulshada)

Si aad u bedesho macluumaadka ku jira duwaankaaga lambarka Social Security (Badbaadada Bulshada) (sida, bedelka magaca ama dhalashada, ama sixitaanka macluumaadka taariikhda dhalashada) waa inaad keentaa waraaqo xaqijinaya aqoonsigaaga, taageeraya dalabkaaga bedelka, iyo oo aad sheegtaa sababta aad u bedelayo. Tusaale ahaan, waa inaad keentaa shahaadada dhalashada si aad u muujiso taariikhdaada saxda ah ee dhalashada. Waraaqaha xoojinta ee bedelka magaca waa inay noqdaan kuwii ugu danbeeyay oo ay sheegayaan haybtaada magacyada hore iyo magacyada cusub. Hadii bedelka magacu uu dhaco laba sano kahor ama hadii waraaqaha bedelka magucu ayna ku qornay macluumaad ku filan oo xaqijinaya haybtaada, waa inaad sidoo kale keentaa waraaqo xaqijinaya aqoonsigaagaee magacaaga hore iyo/ama mararka qaar magacaaga sharciga ah. Hadii aad ku dhalatay meel ka baxsan Maraykanka, waa inaad keentaa waraaqaha si aad u xaqijiso in aad hysato dhalashada Maraykanka ama wakhtiga xaadirkan, si sharci ah inaad ku degan tahay, xaalada ogolaanshaha shaqada. Ka eeg bogga 2 wixii sharaxaad ah ee waraaqaha la ogol yahay.

XADIDAADA BEDELKA KAADHADHK SOCIAL SECURITY (Badbaadada Bulshada)

Sharciga Shacabka ee 108-458 waxa uu xadidayaa tirada bedelka kaadhadhka Social Security (Badbaadada Bulshada) oo waxa aad heli kartaa 3 sanadkii iyo 10 inta aad nooshahay. Kaadhadhka la bixyo waxay muujinayaan bedelka magacaaga sharciga ah ama isbedelka sharciyada ogolaanshaha shaqo laguma tiriyo xadidaadahan. Waxa aanu sidoo kale ka dhaafi karnaa xadidaadahan ruuxa hadii aad keento cadayn ka socota ilo maamulka ah oo lagu sheegayo in kaadhka Social Security (Badbaadada Bulshada) loo baahan yahay.

HADII AAD QABTO WAX SU'AALO AH

Hadii aad qabto wax su'aalo ah oo ku saabsan foomkan ama ku saabsan waraaqaha cadaynta ee ay tahay inaad keento, fadlan boogo websaytka www.socialsecurity.gov (kaliya waxa uu ku qoran yahay Ingiriisi) wixii macluumaad dheeraad ah waxaa laga helayaa sidoo kale goobaha xafiisyadeena iyo Social Security Card Centers. Waxa aad sidoo kale kala hadli kartaa Social Security (Badbaadada Bulshada) 1-800-772-1213. Waxaad sidoo kale ka heleysaa xafiiska kuugu dhaw ama Card Center (Kaadhka Xarunta) buugaaga taleefanka ee deegaanka.

HA BUUXIN. KANI MA AHA ARJI

WARAAQAHAD CADAYMAHA AH

Liisaska soo socdaa waxaa weeye tusaal; ayaasha noocyada waraaqaha ee ay tahay inaad soo raaciso arjigaaga oo dhamaan kuma jiraan. Nagala soo hadal 1-800-772-1213 hadii aanad keeni karin waraaqahan.

MUHIIM: Hadii aad u buuxinayso warjigan ruux kale, waa inaad keentaa cadaymaha muujinaya ogolaanshahaaga inaad saxeexdo arjiga iyo sidoo kale waraaqaha xaqiijinaya haybtaada iyo aqoonsiga ruuxa aad u buuxinayso arjiga. Waxa aanu kaliya aqbalaynaa waraaqaha rasmiga ah ama waraaqaha ay xaqiijisay cida gacanta ku haysa duwaanada rasmiga ah. Nuqlada nootaayada ama footokoobiga aanay xaqiijin cida gacanta ku haysa duwaanka lama aqbalayo.

Cadaynta Da'da

Guud ahaan, waa inaad keentaa shahaadadaada dhalashada. Xaaladaha qaar, waxa aanu aqbali karnaa waraaqo kale oo muujinaya da'daada. Waraaqaha qaar la aqbalo waxaa kamid ah:

- Duwaanka isbitaalka ee Maraykanka ee dhalashadaada (ee la sameeyay wakhtiga dhalashada)
- Diiwaanka diinta ee la sameeyay ka hor da'da shanaad oo muujinaysa da'daada ama taariikhda dhalashada
- Baasboorka
- Bayanka Korsashada Ugu Danbeeya (bayanka korsashada waa inuu muujinaya maclumaadka dhalashada ee laga qoray shahaadada dhalashada ee hore)

Cadaynta Aqoonsiga

Waa inaad keento cadaymaha wakhtigan, ee aan dhicin ee aqoonsiga ee magacaaga sharciga ah. Magacaaga sharciga waxa uu ku qoran yahay kaadhkaaga Social Security (Badbaadada Bulshada). Guud ahaan, waxa aanu doorbidhaa in aanu aragno Waraaqaha Maraykanka ee aad soo gudbisay si loo xaqiijyo haybtaada ee ay tahay inaad muujiso magacaaga sharciga ah IYO maclumaadka taariikhdaada (taariikhdaada dhalashada, da'da, ama magaca waalidka) **iyo/ama** maclumaadka jidhka (sawirka, ama sharaxa jidhka - dhererka, midabka indhaha iyo timada, iwm.). Hadii aad soo dirtay waraaqo aqoon oo leh sawir laakiin aanad adigu iman, waraaquhu waa inay muujiyaan maclumaadkaaga taariikhda (sida, taariikhdaada dhalashada, da'da, ama magacyada waalidka). Guud ahaan, waraaqaha aan lahayn taariikhda ay ku eeg yihii ee dhicitaanka waa inay soo baxaan labadii sano ee ugu danbaysay dadka waawayn iyo afartii sano ee ugu danbaysay caruurta. Cadaynta ahaan aqoonsigaaga, waa inaad keentaa:

- Leesinkaaga ama ruqsadaada darawalnimada ee Maraykanka; ama
- Kaadhka aqoonsiga ee aan liisanka gaadhiga ahayn ee Gobolku sameeyay ee Maraykanka; ama
- Baasboorka Maraykanka

Hadii aanad haysan wax waraaqo ah oo kamid ah kuwa ku qoran kor ama aan la bedeli karin 10 maalmood oo shaqo, waxa aanu aqbali karnaa waraaqo kale oo muujinaya magacaaga sharciga ah iyo maclumaadka taariikhda, sida kaadhka aqoonsiga ciidanka ee Maraykanka, Shahaadada Dhalashada, kaadhka aqoonsiga ee shaqada, nuqlka la xaqiijiyay ee duwaanka caafimaadka (xarunta caafimaadka, dhakhtarka ama isbitaalka), kaadhka aqoonsiga caafimaadka, kaadhka Medicaid (Medicaid), ama kaadhka/duwaanka aqoonsiga dugsiga. Caruurta yaryar, waxa aanu aqbali karnaa duwaankaaga caafimaadka (xarunta caafimaadka, dhakhtarka, ama isbitaalka) ee uu hayo bixiyaha caafimaadku. Sidoo kale waxa aanu aqbalnaa bayaanka korsashada ugu danbeeya, ama kaadhka aqoonisiga dugsiga, ama duwaanka kale ee dugsiga ee uu hayo dugsigu.

Hadii aanad haysan dhalashada Maraykanka, waxa aanu sidoo kale eegi karnaa waraaqaha laanta socdaalka Maraykanka iyo baaskaaga ajaanibka ah ee uu la socdo maclumaadka taariikhda ama sawirku.

MA AQBALAYNO SHAHAADADA DHALSHADA, DUWAANKA DHALASHADA ISBITAALKA, SHAHAADADA, WARAAQAHADAKA KAADHKASOCIAL SECURITY (BADBAADADA BULSHADA) AMA DUWAANKA SOCIAL SECURITY (BADBAADADA BULSHADA) cadaynta ahaan aqoonsiga.

Cadaynta Dhalashada Maraykanka

Guud ahaan, waa inaad keentaa shahaadadaada dhalashada Maraykanka ama Baasboorka Maraykanka. Waraaqaha kale ee aad keeni karto waxaa kamid ah Warbixinta Qunsuliyada ee Dhalashada, Shahaadada Dhalashada, ama Shahaadada Qaadashada Dhalashada.

HA BUUXIN. KANI MA AHA ARJI

Cadaynta Xaalada Laanta Socdaalka

Waa inaad keento waraaqaha aan dhicin ee ay bixisay Department of Homeland Security (Waaxda Arrimaha Gudaha) (DHS, xarfaha uruuriska oo ku qoran Ingiriisi)) oo muujinaya xaalada laanta socdaalka, sida Foomka I-551, I-94, ama I-766. Hadii aad tahay arday caalami ah ama booqasho is waydaarsi aqooneed ku jooga, waxa lagaaga baahanayaa inaad keento waraaqo dheeraad ah, sida I-20, DS-2019, ama warqada ogolaanshaha shaqada ee dugsigaaga ama cida aad u shaqayso (F-1) ama kafaale qaadaha (J-1). MA aqbalno waraaqaha muujinaya inaad dalbatay waraaqaha. Hadii aan lagu ogolaan inaad ka shaqayso Maraykanka, waxa aanu ku siin karnaa kaadhka Social Security (Badbaadada Bulshada) kaliya hadii aad ugu baahan tahay lambarka sababto aan shaqo ahayn oo sax ah. Kaadhkaaga waxaa lagu calaamadin doonaa inuu muujiyo in aanad shaqayn karin iyo hadii aad shaqayso, waxa aanu wargelin doonaa DHS. Ka eeg bogga 3, shayga 5 wixii macluumaad dheeraad ah.

SIDA LOO BUUXIYO ARJIGAN

U buuxinta iyo saxeexida arjigan si SHARCI AH iyada oo la adeesanayo KALIYA khad buluug ama madaw ah ee foomka lifaaqaha ah ama lasoo dejiyay iyada oo la isticmaalayo warqad ah 8 ½" x 11" (ama A4 8.25" x 11.7").

GUUD AHAAN: Shayada ku qoran foomka iskood ayay isku sharaxayaan ama hoos aaya lagaga hadli karaa. Tirada waxay u dhigmaan tirada shayada ee ku qoran foomkan. Hadii aad buuxinayso foomkan sababo kale, fadlan buuxi shayada maadaama oo ay khuseeyaan ruuxaas.

4. Muuji bisha, maalinta, iyo sanadka dhalashada oo buuxa (4 god); tusaale ahaan, "1998" si loo sheego sanadka dhalashada.
5. Hadii aad eegto "Legal Alien Not Allowed to Work" (Cida Sharciga Ku Joogta ee Inay Shaqayso Aan Loo Ogolayn) ama "Other" (Waxkale), waa inaad keentaa waraaqaha ka socda Maraykanka, Federalka, Gobolka ama hay'ada deegaanka ee sharaxa sababta aad ugu baahan tahay lambarka Social Security (Badbaadada Bulshada) iyo in aad u baahan tahay dhamaan shuruudaha gunada ee dawlada. OGGOW: Badi hay'aduhu ma waydiyaan qofka lambarka Social Security (Badbaadada Bulshada). Nala soo xidhiidh hadii sababtaadu u qalanto lambarka Social Security (Badbaadada Bulshada).
- 6., 7. Bixinta macluumaadka qoomiyada iyo isirku waa ikhtiyaar oo ma saameeyo go'aanka arjigaaga. Waxaan u dalbanaynaa macluumaadkan daraasada iyo ujeedo tirakoob, si loo xaqiijiyo in dhamaan macaamiisheenu inay helaan daawayn cadaalad ah oo loo siman yahay.
- 9.B., 10.B. Hadii aad dalbato kaadhka rasmiga ah ee Social Security (Badbaadada Bulshada) ee ilmahaaga ka yar 18 jirka, waa INAAD keentaa lambarka Social Security (Badbaadada Bulshada) ee waalidka iyada oo waalidka aanay hore u lahayn moojee lambarka Social Security (Badbaadada Bulshada). Hadii aan la garanaynin lambarka oo aanad heli karin, sax sanduuqa "lama garanayo".
13. Hadii taariikhdaada dhasho ee aad ku qortay shayga 4 uu ka duwanaado taariikhda dhalashada ee iminka ku jira duwaankaaga Social Security (Badbaadada Bulshada), ku qor taariikhda dhashada ee ka muuqda duwaankaaga shayga 13 oo waxa aad keentaa cadayn aad ku xoojinayso taariikhda dhalahsada ee ka muuqda shayga 4.
16. Muuji cinwaanka aad ku heleyso kaadhkaaga 7 ilaa 14 maalmood iminka kadib.
17. YAA SAXEEXI KARA ARJIGAAGA? Hadii aad tahay 18 jir ama ka wayn tahay oo aad jidh ahaan iyo maskixin aad awoodo inaad akhrido oo aad buuxiso arjiga, waa inaad saxeexaa shayga 17. Hadii aad ka yar tahay 18 jir, laftaada aaya saxeexi kara, ama waalidka ama koriyaha aaya kuu saxeexi kara. Hadii aad ka wayn tahay 18 jir oo aanad iskaa u saxeexi karin, koriyaha sharciga ah, waalidka ama qaraabo kuu dhaw aaya guud ahaan kuu saxeexi karta. Hadii aanad ku saxeexi karin magacaaga, waa inaad ku saxeexdaa calaamada "X" oo laba ruux waa inay markhaati ahaan kuugu saxeexaan meesha banaan ee ku xigta calaamada. Fadlan waxba haka bedelin saxeexaaga adiga oo ku daraya macluumaad dheeraad ah layinkaaga saxeexa maadaama oo ay ka dhigayso arjigaaga inuu noqdo mid khaldan. Nagala soo hadal hadii aad qabto su'aalo ku saabsan cida saxeexi karta arjigaaga.

SIDA LOOSOO GUDBIYO ARJIGAN

Badanaa, waxa aad u qaadi kartaa ama boosta ugu diri kartaa jigan oo saxeexan oo ay la socdaan waraaqaha wax kamid ah xafiisyada Social Security (Badbaadada Bulshada). Wixii waraaqo ah ee aad boosta noogu soo dirta waa laguu soo celin doonaa. Booqo <https://secure.ssa.gov/apps6z/FOLO/fo001.jsp> (kaliya ku qoran Ingiriisi) si aad u hesho xafiiska Social Security (Badbaadada Bulshada) ah ama Social Security Card Center (Xarunta Kaadhka Badbaadada Bulshada) ee aagaaga ka shaqaysa.

HA BUUXIN. KANI MA AHA ARJI

ILAALI SECURITY NUMBER (LAMBARKAAGA AMAANKA BULSHADA) IYO KAADHKAAGA

Ka ilaalisho kaadhkaaga SSN iyo lambarka inuu kaa lumo ama haybtaada ama aqoonsigaaga in la xado. HA sidan kaadhkaaga SSN. Hakuu yaalo meel amaan ah oo kaliya qaado marka ay tahay inaad tuso gaadhkaaga cid, sida, inaad hesho shaqo cusub, inaad furato xisaab bangi oo cusub, ama inaad ka hesho gunooyin hay'adaha Maraykanka qaar. Taxadir marka aad siinayso dadka kale lambarkaaga Social Security (Badbaadada Bulshada), gaar ahaan marka aad ku hadlayso taleefanka, boosta dirayso, iimeel iyo dalabaadka internetka ee aanad adiga dalabkooda bilaabin.

PRIVACY ACT STATEMENT (BAYAANKA SHARCIGA SIRTA) Uruurinta iyo Iisticmaalka Macluumaaadka Shakhsii Ahaaneed

Qaybaha 205 iyo 702 ee Social Security Act (Sharciga Badbaadada Bulshada), sida kor lagu sheegey, waxa uu noo ogol yahay in aanu uruurino macluumaaadkan. In nala siyo macluumaaadkan waa ikhtiyaar. Laakiin, hadii aad nasiin waydo dhamaan ama qayb kamid ah macluumaaadkan waxay noo diidaydsaa in aanu ku siino lambar Social Security (Badbaadada Bulshada) iyo in aanu ku siyo ama kuu bedelno kaadhka Social Security (Badbaadada Bulshada).

Waxa aanu u adeegsan doonaa macluumaaadka aan na siiso in aanu kugu siino kaadh kale oo Social Security (Badbaadada Bulshada) ah. Waxa aanu sidoo kale u bixin karnaa macluumaaadkaaga ujeedooyinka soo socda, oo loo yaqaan isticmaalada joogtada ah;

- Hay'adaha Federalka, Gobolka, iyo deegaanka si ay gacan uga gaystaan maamulida sugitaanka dakhliga iyo barnaamijyada caafimaadka, marka sharciga Federalku uu u ogol yahay inay isticmaalaan lam, barka Social Security (Badbaadada Bulshada); iyo
- Ardayda wakhtigooda ku deeqa, dadka ku shaqeeya heshiiska adeega shakhsii ahaaneed, iyo dadka kale ee loo baahan yahay inay galaan macluumaaadka ku jira duwaanadeena si ay u gutaan masuuliyadahooda hay'adu u igmatay.

Sidoo kale, waxa aanu la wadaagi karnaa macluumaaadkan si waafaqsan Privacy Act (Sharciga Sirta ah) iyo shuruucda Federalka ee kale. Tusaale ahaan, meesha la ogol yahay, waxa aanu u iisticmaalnaa oo aanu u bixinnaa macluumaaadka barnaamijya is waafajinta kombuyutarka, duwaana kale ee is barbar dhiga duwaanada si loo ogaado ama loo xaqijiyo u qalanka barnaamijyada gunada Federalka iyo dib u bixinta lacagta sida khaldan ama kale loo geliyay ee hoos yimaada barnaamijyadan.

Qor isticmaalada joogtada ah ee dheeraad ah ee laga heli karo Privacy Act System of Records Notices (Wargelinta Duwaanka Nidaamka Sharciga Sirta) (SORN, xarafaha uruurisku waa Ingiriisi) 60-0058, Fayalashada Waawayn ee ay ku qoran tahay lambarka Social Security (Badbaadada Bulshada) (SSN, xarafaha uruuriska oo ku qoran Ingiriisi) Sitaha iyo SSN Arjiyada, sida lagu baahiyay Federal Register (Duwaanka Federalka) (FR, xarafaha uruuriska oo ku qoran Ingiriisi) Disember 29, 2010, ee 75 FR 82121. Wixii macluumaaad dheeraad ah, iyo liiska dhamaystiran ee dhamaan SORN, waxaa laga heleyaa websaytkeena www.ssa.gov/privacy (kaliya ku qoran Ingiriisi).

Bayaanka Paperwork Reduction Act (Sharciga Yaraynta Waraaqaha) - Uruurinta macluumaaadkan waxa uu buuxiyaa shuruudaha 44 U.S.C. § 3507, iyaga oo ah waxka bedelka 2 ee Paperwork Reduction Act of 1995 (Sharciga Yaraynta Waraaqaha ee 1995). Lagaagama baahna inaad ka jawaabto su'aalahan iyada oo aanu sheegno ma ogiye inuu khaldan yahay lambarka maamulida Office of Management and Budget (Xafiiska Maamulida iyo Miisaaniyada). Waxa aanu qiyaasaynaa inay qaadan doonto inta u dhexaysa 5 iyo 60 daqiiko in la akhriyo tilmaamaha, uruurinta xogta, iyo ka jawaabida su'aalaha. **SOO DIR AMA KEEN FOOMKA BUUxa XAFIISKAAGA DEEGAANKA EE SOCIAL SECURITY (BADBAADADA BULSHADA)**. **Waxa aad ka heleysaa xafiiska Social Security** (Badbaadada Bulshada) [wesbaytka SSA www.socialsecurity.gov](http://www.socialsecurity.gov) (kaliya ku qoran Ingiriisi). **Xafiis yada sidoo kale waxaa ku hoos qoran yihiin U. S. Government agencies** (hay'adaha Dawlada ee Maraykanka) buga taleefanka ama waxa aad kala hadli kartaa Social Security (Badbaadada Bulshada) **1-800-772-1213 (TTY 1-800-325-0778)**. **Waxa aad noogu soo diri kartaa wixii fikir ah ee aad qabto ee ku saabsan culayska qiyaasta ama wixii kale ee ku saabsan uruurintan, oo ay ku jiraan taloooyinka yaraynta culayskan: SSA, 6401 Security Blvd, Baltimore, MD 21235-6401. Soo dir kaliya fikirada la xidhiidha qiyaasteena wakhtigan cinwaankan, ha usoo dirin foomka buuxa.**

Arjiga Kaadhka Social Security (Badbaadada Bulshada)

	MAGACA KA MUUQDA KAADHKA	Magaca	Magaca Dhexe Oo Dhamaystiran	Awowga		
1	MAGACA SADEXAN EE MARKA AAD DHALATAY LAGUU BIXIYAY HADII UU KA DUWAN YAHAY KA SARE MAGACYO KALE OO AAD ISTICMAASHO	Magaca	Magaca Dhexe Oo Dhamaystiran	Awowga		
2	Lambarka Social Security (Badbaadada Bulshada) ee hore qofku ugu qoray shayga 1	[REDACTED]	[REDACTED]	[REDACTED]		
3	TAARIKHDA DHALASHADA (Maaxa Xarfaha Uruuriska ah) ama Degmada Ajaanibka ah	Magaalada Gobolka	Office Use Only (tKaliya waxaa isticmaalaya Xafiiska)	4 TAARIKHDA DHALASHADA		
5	DHALASHADA (Sax Mid)	<input checked="" type="checkbox"/> Muwaadib Maraykan	Ruux Haysta <input checked="" type="checkbox"/> Sharci Shaqo	Ruux Sharci Ku Jooga Balse Loo <input checked="" type="checkbox"/> Ogolayn Inuu Shaqeeyo (Eeg Tilmaamaha Ku Yaal Bogga 3)	Waxkale (Eeg Tilmaamaha Ku Yaala Bogga 3)	
6	QOOMIYAD Ma waxa aad tahay Hisbaanig ama Latino? (Jawaabtaadu Waa Ikhaytaar) <input checked="" type="checkbox"/> Haa <input checked="" type="checkbox"/> Maya	7 ISIR Dooro mid ama wax ka badan (Jawaabtaadu Waa Ikhaytaar)	<input checked="" type="checkbox"/> Dhalad Hawaii <input checked="" type="checkbox"/> Dhalad Alaska	<input checked="" type="checkbox"/> Hindida Maraykanka <input checked="" type="checkbox"/> Madaw/Afrikaan Maraykan	Jasiirada Kale ee Baasifiga <input checked="" type="checkbox"/> Cadaan	
8	JINSIGA	<input checked="" type="checkbox"/> Lab	<input checked="" type="checkbox"/> Dhedig			
9	A. WAALID/HOOYO MAGACA DHALASHADA	Magaca Kowaad	Dhexe Oo Dhamaystiran	Danbe		
	B. LAMBARKA WAALIDKA/HOOYADA SOCIAL SECURITY (BADBAADADA BULSHADA) (Ka eeg tilmaamaha 9B Bogga 3)				<input checked="" type="checkbox"/> Lama Garanayo	
10	A. WAALID/AABAHA MAGACA DHALASHADA	Magaca Kowaad	Dhexe Oo Dhamaystiran	Danbe		
	B. LAMBARKA WAALIDKA/AABAHA SOCIAL SECURITY (BADBAADADA BULSHADA) (Ka eeg tilmaamaha 9B Bogga 3)				<input checked="" type="checkbox"/> Lama Garanayo	
11	Miyaa ruuxa ku qoran shayga 1 ama qof kale oo mataya isaga/iyada hore u saxaysay ama ay u heshey kaadhka lambarka Social Security (Badbaadada Bulshada) hore? <input checked="" type="checkbox"/> Haa (hadii "haa" aad ku jawaabto su'aalaha 12-13)	<input checked="" type="checkbox"/> Maya	<input checked="" type="checkbox"/> Magaranayo (hadii "magarnaayo" ay tahay, qabo su'aasha 14.)			
12	Magaca ku qoran kaadhka Social Security (Badbaadada Bulshada) ee dhawaan la sameeyay ee ruuxa ku qoran foomka ku qoran shayga 1	Magaca Kowaad	Dhexe Oo Dhamaystiran	Danbe		
13	Geli wixii taariikhda dhalasho ee ka gedisan hadii lagu isticmaalay arjiga hore ee kaadhka			BB/MM/SSSS		
14	TAARIKHDA MAANTA	BB/MM/SSSS	15 LAMBARKA TALEEFANKA MAALINKII	Furaha Aaga	Lambarka	
16	CINWAANKA BOOSTA		Cinwanaka Jidka, Lambarka Guriga, PO BOX, Lambarka Jidka Miyiga			
		Magaalada	Gobolka/Dalka Ajaanibka ah	ZIP Koodhka		
	(Maaha Xuruuf La Uruuriyay)					
17	Waxa aan bayaaminayaa aniga oo og ciqaabka in aan eegey dhamaan macluumaadka ku yaala foomkan, iyo wixii bayaano ah ee la socda ama foomamka, iyo inay yihiin run oo ay saxan yihiin ilaa inta aan ogahay.					
	SAXEEXAAGA	18	XIDHIIDHKA IDINKA DHAXEEYA RUUXA KU QORAN SHAYGA 1 WAA:			
			Waaldika <input checked="" type="checkbox"/> Laftaada <input checked="" type="checkbox"/> Dhalay ama Korsaday	Koriyaha <input checked="" type="checkbox"/> Sharciga ah	Waxkale <input checked="" type="checkbox"/> Sheeg	

HA BUUXIN. KANI MA AHA ARJI

DO NOT WRITE BELOW THIS LINE (FOR SSA USE ONLY) (HAKU QORIN WAX KA DANBEEYA LAYNKEN (KALIYA WAXAA ISTICMAALAYA SSA)

NPN		DOC	NTI	CAN	ITV		
PBC	EVI	EVA	EVC	PRA	NWR	DNR	UNIT
EVIDENCE SUBMITTED					SIGNATURE AND TITLE OF EMPLOYEE(S) REVIEWING EVIDENCE AND/OR CONDUCTING INTERVIEW		
					DATE		
					DCL	DATE	